TAREENKA DHEEREEYA LONDON - GALBEEDKA MIDLANDS

Sinnaantu waxay saameysaa qiimeynta cusboonaysiinta: CFA1 Xarunta Euston iyo habka

Sookoobitaanka

Sibteembar 2015



Khariirada wadada HS2

Muxuu ku saabsan yahay qiimeynta (EqIA) ee raadka sinnaanta HS2?

Isbedelada goobta Euston

Xawaaraha Sare ee Labaad (HS2) waa wada tareenka xawaarihiisu sareeyo oo ay dawladu qorsheynayso.

Wuxuu ka bilaabanayaa boosteejada Euston ee London wuxuuna isku xirayaa magaalooyinka kale ee waaweyn ee Ingiriiska.

Laba sano ka hor, HS2 Ltd waxay u dirtay Baarlamaanka qorshahooda ku saabsan dhismaha iyo isticmaalida qaybta koowaad ee tareenka u dhaxeeya London iyo Galbeedka Midlands (Wejiga Koowaad). Tan waxaa ka mid ah naqshada boosteejada Euston oo qaadan doonta 10 sanno in lagu dhiso.

HS2 Ltd waxay hadda cusbooneysiisay naqshada ay u qorsheeyeen boosteejada Euston iyo tallaabada (CFA1). Waxaad ku arki kartaa khariirada goobtan bogga 3aad. Isbedelada Euston waxay qayb ka yihiin soojeedinta balaadhan ee isbedelada wadada u dhaxeysa London iyo Birmingham.

Waa maxay *macluumaadka cusub ee sinnaanta saameysa qiimeynta ?*

Sinnaanta saameysa qiimeynta (EqIA) waxay caawineysaa si ay u tusto in HS2 Ltd ay heysato tixgelinta arimaha sinnaanta ee dhici kara isbedelo kasta ka hor intaan loo ogolaan inay dhacaan.

2013 EqIA waxay tixgelisay saameynta sinnaanta ee dhici karta ee ay ku leedahay dhammaan Wejiga Koowaad.

Iyadoo ay waxyaalo kale ku jiraan, dhisida wadada cusub ee tareenka waxay bedeli kartaa sida qaar dadku waxay ku safraan iyagoo ku wareegaya goobta Euston, meelahay u baahan yihiin inay aadaan iyo xitaa, xaaladaha qaarkood, meeshay ku nool yihiin.

Tan ***warbixinta cusub ee EqIA*** waxay kuu sheegaysaa waxay tahay saameynta sinnaanta ee dhici karta ee isbedeladaan la qorsheeyey Euston, iyo tallaabooyinka suurtagalka ah ee HS2 Ltd ayaa qaadi karta si ay idiin caawiyaan.

Isbedeladan iyo dadka leh 'astaamaha la ilaaliyey'

In ***warbixinta EqIA*** wuxuu ku saabsan yahay sida isbedelada la qorsheeyey ee dhisida iyo ka shaqeynta wadada tareenka ee Euston wuxuu saameynayaa dadka 'kooxaha la ilaaliyey' ama leh 'astaamaha ilaashan' –sida dadka dhalinyarada ah ama dadka waaweyn ee leh xaalado ama asalo, diimo ama nooc nololeedka.

'Astaamaha la ilaaliyey' waxay ku leeyihiin micne khaas ah sharciga.' Xeerka Sinnaanta ee 2010 wuxuu sharxayaa in tani ay noqon karto da'daada, iinta, jinsiga, jinsi dib u hagaajinta, guurka iyo wehelka madaniga ah, hooyada iyo uurka, jinsiyada, diinta ama waxay rumeysan yihiin, iyo wacyiga galmada. Waxaan ka ogaan kartaa wax badan oo ku saabsan Xeerka Sinnaanta 2010 interneetka.

Dadka leh astaamaha la ilaaliyey ee ku nool ama ka shaqeeya Euston, ama isticmaala boosteejada Euston, isbedeladani way saameyn karaan **in ka badan** ('oo aan is le'eekeyn), ama **ama si gaar ah** ('ka duwan').

Saameynta aan is le'eekeyn , waxay ka dhici kartaa meesha tiro badan oo dad ahi oo leh astaanta la ilaaliyey ay joogaan goobta degaanka marka loo eego London Borough ee Camden ama Greater London guud ahaan, ama meesha kooxaha la ilaaliyey isticmaalaan ama ay isku haleeyaan tasiilaadka si kabadan dadka kale.

Saameynta ka duwan way dhici kartaa sababtoo ah baahiyo khaas ah ama xasaasiyad la aqoonsan yahay oo la xiriirta mid ama wax ka badan astaamaha la ilaaliyey.

Meesha ***warbixinta dheeraadka ah ee EqIA*** ay qeexayso saameynaha sinnaanta ee dhici karta, waxay sidoo kale dejisaa tallaabooyin suurtagal ah oo lagu caawinayo.

Euston Square Gardens

Sidee bay isubedeleen qorshayaasha Euston?

Qorshayaasha dib loo eegay ee Euston waxay micnahoodu noqon doonaa u dhisida boosteejada xawaaraha sare laba heer gudahood. Waxay micnaheedu noqon doonaa:

- Adeegyada Wejiga Koowaad ee HS2 (London – Galbeedka Midlands) waxay bilaaban karaan 2026
- Adeegyada Wejiga Labaad ee HS2 (Waqooyiga iyo Galbeedka Midlands) waxay bilaaban karaan 2033
- Boosteejada Euston waxaa mari kara tareeno caadi ahaan ka badan markay socoto shaqada dhismaha HS2
- Dhisida boosteejada cusub waxay qaadan doontaa 15 sanno.

Maxaan hadda sameyn karaa?

HS2 Ltd waxay jeclaan lahayd inaad akhriso warkan soo kooban, iyo warbixinta buuxda *ee EqIA*, ka dib ka dhiibo fekerkaaga ku saabsan isbedelada.

HS2 Ltd waxay doonaysaa inay hubto inay heysato dhammaan macluumaadka ay u baahan tahay si ay go'aan u gaarto waxyaalaha saxda ah ee dadka ku jira kooxaha la ilaaliyey oo noqon kara kuwo si ka badan ay u saameysay, ama ay u saameysay si gaar ah marka la barbar dhigo kuwa kale ee goobta jooga.

Booqo bogga wadatashiga EqIA ee www.gov.uk/hs200 raac tallaabooyinka si aad u sheegto fikradahaaga HS2 Ltd.

Tani waa wadatashi dadweyne. HS2 Ltd waxay soo dhaweynaysaa jawaabaha qofkasta ama urur.

Wadatashiga waxaa la xiri doonaa 11:45 habeenimo 6 Nofeembar 2015.



Tallaabada iyo Boosteejada Euston (CFA1)

Halkan waxaa ah dhammaan warbixinta cusub ee ugu muhiimsan ee HS2's EqIA

Isbedelada Euston hareeraheeda ka dhacayaa waxay u saameyn doonaan dadka qaarkii iyo meelo si ka badan kuwa kale.

Haddii aad ku jirto kooxda la ilaaliyey, qaybtan ayaa kaa caawin doonta inaad aragto haddii adiga lagu saameyn karo.

Dhulka Baagga Regent

Shaqada dhismuhu waxay ka bilaabaneysaa 2017 ilaa 2033

Waayida guryaha ku yaal Regent's Park Estate, Stalbridge House, wadada Melton, Wadada Euston, Wadada Cobourg iyo Granby Terrace

220 guri oo ku yaal Regent's Park Estate ayaa loo baahan doonaa in la dumiyo saadaraadeed si HS2 Ltd ay u sameyn karto shaqada dhismaha ee boosteejada Euston.

HS2 Ltd waxay maalgelinaysaa 70 guri kiro bulshadeed ah Dugsiga Hoose Dhexe ee Netley goobta iyo 66 guri kiro bulshadeed oo ku yaal Regent's Park Estate.

Tan micnaheedu waxaa weeye in dhammaan kireystayaasha guryaha bulshada ee doonaya inay ka guuraan guryaha la duminayo ee ku yaal Regent's Park Estate iyo Wadada Cobourg weli waxay ku noolaan karaan meel dhow.

- Haddii aad tahay kireystaha guryaha bulshada waxaa jiri doona qof ku taageera ilaa 12 bilood markaad guriga ka guureyso. London Borough ee Camden ('Golaha Camden') iyo Xoghaynta Gobolka waxay ka gaareen heshiis sharci ah oo ku saabsan tans.
- Golaha Camden waxay soo jeediyeen inay sameeyaan 24 guri oo cusub oo loogu talagalay deganayaasha heshiiska leh ee doonaya inay ka guuraan guryaha la duminayo, inay ku iibsadaan si loogu siman yahay guriga.
- Waxaa jiri doona waxoogaa faa'iido ah oo ay leeyihiin guriyeynta tayada leh ee cusub , laakiinse dadka qaarkii sidoo kale way dareemi karaan:
    - Culeys maskaxeed, welwel, luminta xiriirka kooxeed ee ka dhexjira kireystayaasha bulshada, degenayaasha heshiiska kirada leh iyo dadka kale ee ku nool Regent's Park Estate;
    - Culeyska maskaxeed, welwelka, luminta xiriirka kooxeed iyo meelahaad aadayso, iyo carqaladeynta kireystayaasha gaarka ah ee deganaha ahayn guryaha kuwa heysta heshiiska guryaha ee guryahooda la duminayo, iyo
    - Kala duwanaanta siday dadka ku kala duwan qaran ahaan, madow, eeshiyaan iyo jinsiyadaha laga tirada badan yahay (BAME) ama aqoonsi diimeedka goobta way wada nool yihiin.

HS2 Ltd

Waddada Cobourg

Saameynta Sanqadha

Dadka degan Ampthill Estate, Regent's Park Estate iyo goobta Wadada Cobourg lagama yaabo inay si weyn u saameynayo sanqada guryahooda gudahooda sababtoo ah iska ilaalin hore loo qorsheeyey siyaalo wax looga qabto, oo ay ku jiraan sanqad yareeyo meeshii lagama maarmaan ah, ayaa jiri doonta.

Dadka degan Regent's Park Estate iyo Ampthill Estate waxay marmarka qaarkood maqli doonaan sanqada dhismaha markay wakhti ku qaadanayaan bannaanka.

- Haddii aad tahay qof dhalinyaro ah ama ilmo, asal ahaan ka soo jeeda Soomaali, curyaan ah, oo ku jira qoys muslim ah ama waalid kaliya ah oo dumar ah dakhligana laga xanibay, waa inaad *ka badan* waxay u eg yihiin inay ku nool yihiin meelaha laga yaabo inaad ku maqasho sanqada bannaanka oo heerkeedu sareeyo.
- Dadka qaarkood leh astaamaha la ilaaliyey, sida iinta sababtoo ah xasaasiyada sanqada ay u leedahay, waxay arki doonaan *gaar ahaan* saameyn ka timid heerarka sanqada la bedelay ee guryahooda dhexdooda.

Saameynta tayada hawada

Carruurta ama dadka iinta leh, ama dadka ka soo jeeda madowga, eeshiyaanka ama laga tirada badan yahay jinsiyadeed (BAME) ama asal ahaan Muslim ah, ee ku nool Regent's Park Estate waxay u ogaan karaan saameynta tayada hawada si ka sii badan.

Dadka ka degan meel kasta goobta Euston waxay ogaanayaan isbedelada tayada hawada laakiinse hadda HS2 Ltd ma oga kooxaha kale ee ah astaamaha la ilaaliyey ee laga yaabo inay ogaadaan tah *si ka sii badan*.

Khubaradu waxay tixgeliyaan in saameynta caafimaad ee bulshada oo dhan ahi inta ay socoto shaqada dhismaha ee ay keentay isbedelada tayada hawadu waxay noqonayaan wax yar, iyo saameynta ay sii yaraan doonto marka HS2 ay soconeyso ka dib 2033. Si kastaba ha ahaatee, dadka qaarkii waxay dareemi doonaan welwel ku saabsan aaminaad saameyn caafimaad oo ka imanaysa gaadiidka oo bata, gaar ahaan dadka haddaba qaba dhibaatooyin caafimaad oo saameynaya neefsigooda.

- Haddii aad tahay qof weyn, ilmo yar, ama aad leedahay xaalad caafimaad oo iin ah sida neefta, waxaad awoodaa *gaar ahaan* ogaanshaha isbedeladaan ee tayada hawada.

Saameynta helitaanka

Dadka ku nool lambarada 16 ilaa 36 Park Village East ma awoodi doonaan inay helaan gaadhi sida gaari yar, taksi ama Van ka alaabta lagu qaado inuu istaago gurigooda hortiisa, ilaa lix sanno.

Adeegyada Xaallada degdega ah weli waa awoodi doonaan inay istaagaan guryahaan bannaankooda.

Lix sanno ama wax ka yar, helitaanka gawaadhi istaagta guryahan horta waxay ku noqon doontaa caadi.

- Haddii aad tahay qof weyn ama qof iin leh oo ku nool guryahaan, waxaad noqon kartaa *gaar ahaan* mid ay saameyso isbedeladaan sababtoo ah waxaa laga yaabaa inaad isku haleyso gaadiid ku qaada meeshii aad ku tegi lahayd meelaha lug.

Saameynta xarumaha bulshada

Qolka Kireystayaasha ee Weyn ee ku yaal Wadada Harrington iyo Qolka Bulshada Dick Collins ee ku yaal Wadada Redhill wuu xirmi doonaa, waxaana ka furmi doona xarun cusub oo bulshadeed Regent's Park Estate.

- Mashruuca Mootada ee Silverdalet, ee ku kulmaya Qolka Kireystayaasha ee da'da weyn, waxay u baahan doonaan meel cusub oo ay ku kulmaan, haddii kale dadka dhalinyarada ah *gaar ahaan* waxay khatar u geli karaan inay ku lug yeeshaan dembi.
- Dadka isticmaala Xarunta Surma ee Wadada Robert waxay ka maqli karaan sanqadh badan shaqada dhismaha ilaa saddex sanno.
- Haddii aad tahay qof dhalinyaro ah ama ilmo isticmaala Xarunta Surma wax ka barasho, waxaad awoodaa *gaar ahaan* inaad maqasho sanqadhaan.
- Dadka da'da weyn, dumarka, ama dadka ka socda kooxaha BAME ee isticmaala xarunta waxaa saameyn kara sanqada *in ka badan* kooxaha kale.

Xarunta Surma ee Waddada Robert

Saameynta xarumaha waxbarashada ama dugsiyada

Dadka wakhtiga ku qaata Xarunta Carruurta ee Regent's Park ama Maria Dugsiga (Hoose) ee Convent wuxuu maqli karaa sanqad badan oo ah ilaa ilaa toddoba sanno sababtoo ah shaqada dhismaha.

- HS2 Ltd waxay eegi doonaan siyaalo macquul ah oo lagu yareynayo ama laysaga ilaalinayo sanqadha ka imanaysa shaqada dhismaha.

Dadka dhigta Dugsiga Hoose Dhexe ee Christ Church CE ee ku yaal Waddada Albany, Dugsiga Francis Holland ee Park Road, ama Dugsiga Diyaarinta ee North Bridge Preparatory ee Parkway waxay maqli karaan wax badan oo ah gaaddiidka alaabada waaweyn qaada marka waxay goynayaan wadada dhow.

Saameynta ay ku leeyihiin xarumaha diinta

Dadka wakhti ku qaata Masaajidka Shah Jalal (Masaajidka Euston) waxay maqli karaan sanqadha dhismaha ilaa shan sanno.

Saameynta xarumaha dhaqanka

Dadka wakhti ku qaata Matxafka Yuhuuda ama Saaxiibada Jaamacadda Hebrewga ee Waddada Albert waxay maqli doonaan sanqadh badan oo gaaddiid sababtoo ah gaaddiidka u socdo jiho kale oo ka duwan inta shaqada dhismuhu ay socoto.

- Haddii aad wakhti ku qaadato xarumahaan, waxaad maqli doontaa sanqadhaan *wax badan*.

Saameynta xarumaha caafimaadka

Dadka isticmaala Xarunta NHS ee Waddada North Gower waxay ka maqli doonaansanqadh ka badan shaqada dhismaha ilaa shan bilood.

- Waxaad noqon kartaa *wax badan*mid u eg inuu maqlo saameyntan haddii aad tahay:
    - qof uur leh ama u socda balamaha la xiriira hooyada;
    - ilmo yar oo la talaalayo ama leh balamo caafimaad la xiriira;
    - qof weyn oo badanaa ama si soo noqnoqod ah u taga xarunta balamaha la xiriira da'da; ama

HS2 Ltd

Meesha Bannaan ee Waddada Hampstead

- Haddii aad qabto xaalad caafimad oo iin leh oo u baahan adeegyada xannaanada muhiimka ah.

Fursado shaqo ee cusub

HS2 Ltd waxay kor u qaadaysaa fursadaha loo siman yahay ee kooxaha la ilaaliyey sida dumarka, dadka iinta leh, dadka dhalinyarada ah, madowga, eeshiyaanka iyo jinsiyadaha laga tiro badan yahay (BAME) kooxaha iyo kooxaha diinta ee laga tirada badan yahay.

HS2 Ltd waxay qaadi doontaa tallaabooyin si ay u hubiyaan in shaqooyinka cusub, tababarka iyo fursadaha ganacsiga ee qaybta dhismaha ay u furan yihiin kooxaha aan sinnaanta dhaqaale helin, ilaa inta suurtagal ah.

Meelaha bannaan ee furan iyo garoonada cayaarta

Jardiinada Afar Geeska ah waxaa la xiri doonaa 17 sanno waxaana dib loo furi doonaa 2033.

Garoonka Waddada Lancing waxaa la xiri doonaa lix sanno. Haddii Camden London Borough ogolaato, HS2 Ltd waxay ka qaadayaan qalabka garoonka cayaarta Waddada Lancing meel u dhow oo furan, si loo awoodo in weli loo sii isticmaalo.

Jardiinooyinka St James, Meesha Bannaan ee Waddada Hampstead iyo goobta cayaarta Eskdale si joogta ah ayey u xirnaan doontaa.

- HS2 Ltd waxay la shaqeyn doontaa London Borough ga Camden si loo hagaajiyo meelaha furan ee dadweynaha ee Regent's Park Estate iyo Ampthill Estate.
- Kadib markay waddada cusub ee tareenku ay furanto 2033, HS2 Ltd waxay dhisi doontaa goob cayaareed siyaalo badan oo isticmaalo iyo garoonka ciyaarta carruurta, dhulka ay simi doonaan, waxayna dhigi doonaan miisas iyo kuraas waqooyiga Regent's Park Estate, inta u dhaxeysa waddada cusub ee tareenka iyo Langdale.

HS2 Ltd's qorshayaal cusub ayaa caawin doona dadka leh astaamaha la ilaaliyey tsi ay si ka yar ugu saameyso shaqada dhismuhu. Laakiin waxaa dhici kara *si gaar ah* saameyno:

- Haddii aad tahay ilmo aad uyar oo ku nool Regent's Park Estate, waxaa laga yaabaa inay kugu qaadato in ka dheer socoshada inta u dhaxeysa guriga iyo goobaha cayaarta.
- Haddii aad tahay ilmo yar, qof dhalinyaro ah, qof da'a weyn ama qof iin leh, waxaad heli doontaa isticmaalida meel bannaan oo nabdoon oo u dhow guriga sababtoo ah guud ahaan meelaha furan ee la waayey.
- Madow, Eeshiyaan iyo jinsiyadaha laga tirada badan yahay (BAME) dadka degan dhulka will waxay u leeyihiin isticmaal ka yar meelaha badnnaan marka loo eego kooxaha dadka kale.

Dadka lugeynaya

Qorshayaasha dib loo eegay ee Boosteejada Euston ayaa fududeyn doonta tegida iyo ka imaansha boosteejooyinka tareenka , ka fudud in lagu dhex socdo Jardiinooyinka Afar geeska ah ee Euston, oo ka fuddud in lagu isticmaalo basaska meelo dhow dhow.

HS2 Ltd waxay u sameyn doonaan shaqada dhismaha si heerar si dadka

lugta ahi ay weli u isticmaali karaan boosteejada.

- Haddii aad tahay ilmo, qof dhalinyaro ah ama qof iin leh, waxaa ku saameyn kara shaqada dhismaha ee ka socota boosteejada iyo hareeraheeda iyo waddooyinka u dhow dhow, taas oo saameynaysa marinkaaga caadiga ah.
- Waxaa laga yaabaa inaad wax ka badan aad u socoto boosteejada hareeraheeda maadaama qaybo ka mid ah goobta loo xiray shaqada dhismaha.

Dadka da'da waa weum, dadka iinta leh ama carruurta dhalinyarada ah ee u isticmaala marinka inay dhex maraan Granby Terrace oo uga gudbaan wadada tareenka waxaa laga yaabaa *gaar ahaan* inay saameyso adoo soconaya in dheer.

Dadka lugeynaya waxay u baahan doonaan inay socdaan wax ka badan 100 mitir in ka badan si ay u dhex maraan boosteejada Euston iyo Waddada Drummond, Waddada Starcross iyo Waddada Euston ilaa galbeedka boosteejada.

Waxaa jiri doona gaaddiid dheeraad ah oo maraya goobta Euston sababtoo ah shaqada dhismaha:

- Qaababka gaaddiidka ee ku hareeraysan boosteejada Euston maalinba maalintay ka danbeyso way isbedeli doontaa, sababtoo ah nooca gaaddiidka ah ee u socda goobaha shaqada iyo waddooyinka xidhan wakhtiga gaaban.
- Gaaddiidka badan ayaa aad u adkeyn doona in waddada lagga gudbo iyadoo la marayo meelaha dad lugeynayaa ka gudbaan. Haddii aad tahay ilmo, qof ka weyn ama a qofka iinta leh ee waddada ka goynaya meel aan calaamad lahayn, waxaad dareemi kartaa ammaan yari.

HS2 Ltd waxay haddaba ogaatay siyaalaha ay u taageerayaan ammaanka dadka lugta ah iyo baaskiilayaasha, iyo in layska ilaaliyo sababida wax la saluugo ama welwel ku saabsan ammaanka, khaas ahaan dugsiyada agtooda iyo meelaha kale ee kooxaha dadka la ilaaliyey ay isticmaalaan. Waxaad ka akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan tan ee HS2 Ltd waxqabadka dhismaha ee qoraal qabyada xeerka. Qorshaha Maareynta Degaanka Xaafada ee aadka u faahfaahsan ayaa wax ka sheegi doona arimaha khaaska ah ee lagu soo qaaday *warbixinta cusub ee EqIA*.

Dadka isticmaalaya basaska

Dhisida buundada Waddada cusub ee Hampstead waxay micnaheedu noqonayaa xirida labada bas joogsi (ee labada dhinac ee Waddada Hampstead) ee bannaanka Silverdale ee Regent's Park Estate. Bas joogsiyada mar labaad ayey dib u furmi doonaan marka buundada cusub la dhiso.

- Madowga, Eeshiyaanka iyo jinsiyadaha laga tirada badan yahay (BAME) degenayaasha Regent's Park Estate, iyo isticmaalayaasha Xarunta Surma waxay noqon doontaa *wax badan* mid la saameeyo marka loo eego kooxaha kale marka joogsiyadaan basaska la xiro.
- U lugeynta joogsiga baska ka duwan waxaa laga yaabaa inay ku yeelato saameyn ka weyn adiga haddii aad tahay waalid ama xannaaneeye ilmaha dhashay iyo carruurta dhalinyarada ah, haddii aad weyn tahay ama aad iin leedahay, ama haddii aad tahay qof dhalinyaro ah oo ku tiirsan basaska.

Basku wuxuu joogsanayaa Waddada Hampstead

Shaqeynta waddada tareenka laga bilaabo 2026

Saameynta Sanqadha

Kadib 2026, dadka ku nool meel u dhow Langdale, Augustus House, Coniston ama Cubitt Court iyo the Regent's Park Estate waxay awoodaan inay maqlaan sanqada gaaddiid badan marka buundada waddada Hampstead la dhisot.

- Carruurta, dadka dhalinyarada ah, dadka ka Soomaalida ah asal ahaan, waalidka kalida ah iyo dadka Muslimka ah ayaa u eg inay la kulmi doonaan kuwaan waxay u saameysaa *wax ka badan* kooxaha kale.
- Haddii aad tahay qof weyn oo degan halkan, waa lagu saameyn karaa *si a gaar ah* sanqadaan gaaddiidka, haddii ay aad u sii adkeyso inaad bannaanka aado.

Baabuurta, gaaddiidka iyo isticmaalka jir ahaaneed

Warbixinta qorshayaasha ayaa fududeyn doona inaad tagto ama ka timaado boosteejada tareenka, oo ay ka sahlanaadaan isticmaalka basaska dhow dhow. Marka boosteejada cusub la dhammeeyo, wiishashka iyo sagxada la maro waxay micnaheedu noqonayaa isticmaalid aan jaranjaro lahayn sagxada waddada tareenka ee la istaago iyo boosteejada dhulka hoostiisa ah ee Euston.

- Tani waxay caawin doontaa dadka iinta leh iyo dadka waa weyn *gaar ahaan.*

Fursado shaqo

Qorshayaasha dib u eegista waxay ka bixiyaan qiyaastii ilaa 500 oo shaqooyin cusub ah boosteejada marka adeegyada tareenka cusubi bilaamaan.

- HS2 Ltd waxay kor u qaadaan fursadaha siman ee dumarka, naafada, dadka dhalinyarada ah,kooxaha madowga, Eeshiyaanka iyo jinsiyadaha laga tirada badan yahay (BAME) iyo kooxaha diinta ee laga tirada badan yahay si shaqooyinka cusub, tababarka iyo fursadaha shaqada waxay u furan yihiin kooxaha dhaqaale ahaan aan fursadaha heysan.

Maxaan u baahan ahay inaan hadda sameeyo?

Injineerada Grimshaw / HS2 Ltd

Marinka boosteejada la soo jeedinayo waxay ku taal Euston

HS2 Ltd waxay u baahan yihiin inay maqlaan sida isbedelada la yimid dhismayaashu waddada tareenka ee cusubi way ku saameyn doontaa.

Waa maxay fikradahaaga ku saabsan warbixinta ***EqIA*** tallaabada iyo boosteejada Euston CFA1?

Dadku waxay bixin doonaan faahfaahinta ugu badan ee suurtagalka ah waxayna noo ogolaan doonaan inaan ogaano haddii aad u maleynaysid inay jiraan wax la gafey qiimeyntaan. Waxaad akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan saameynta ku dhici karta dadka leh astaamaha la ilaaliyey si buuxda ee warbixinta l ***EqIA*** ee www.gov.uk/hs2 iyo helitaanka macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah waraaqaha ku taxan dhammaadka warbixintaan kooban.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad faallo ka bixiso ***warbixinta EqIA*** iyo waxay qorsheynayso, fadlan diiwaangeli waxaad saluugsan tahay foomka la tashiga khaaska ah HS2 Ltd, saa daraadeed HS2 Ltd waxay ku dari kartaa aragtidaada warbixinta kooban ee Baarlamaanka.

Waxaad awoodaa:

- inaad ku jaabto interneetka - raac tilmaamaha www.gov.uk/hs2; ama
- kala soo bax foomka latashiga website ka HS2 Ltd ee www.gov.uk/hs2 iyo midkood:
    - iimeyl ku dir jawaabtaada hs2EustonEqualitiesConsultation@hs2.org.uk; ama
    - boosta ku dir jawaabtaada: FREEPOST EUSTON EQUALITIES.

Haddii aad boosta ku soo dirto jawaabtaada, uma baahnid inaad ku dartid macluumaad dheeraad ah oo aad soo jeedineysid umana baahnid shaabad.

Haddii aad dooneysid inaad ku dirtid jawaabtaada geyn diiwaangashan ama geyn khaas ah, fadlan wac miiskayaga caafimaada Xiriirka Bulshada 020 7944 4908 –way ku farxi doonaan inay tan idiin sameeyaan.

Sidoo kale waxaad ka soo wici kartaa miiskayaga caawimaada 020 7944 4908 si aad u weydiisato dukumiintigan kooban hab kale.

Wadatashigan waxaa la xiri doonaa 11:45 habeenimo 6 Nofeembar 2015.

Ka ogow wax badan oo ku saabsan sida HS2 ay wax u caawineyso

Ilaa iyo 2013, HS2 Ltd waxay daabacday tiro qorshayaal ah oo caawinaya si loo yareeyo saameynta sinnaanta iyo in la fuliyo shuruuda ah Waajibaadka Sinnaanta Qaybta Dadweynaha. Tan waxaa ku jira:

- Warqada Macluumaadka Qorshaha Kudarida iyo HS2 Ltd Sinnaanta, Kala duwannaanta iyo Ku darrida SH2 Ltdr (G5) (waxaa la cusbooneysiiyey Juun 2015). Tani waxay ku tuseysaa HS2 Ltd waxay ku dareysaa dadka ka soo jeeda asalada kala duwan goobta shaqada iyo siday qorsheynayso, nashqadeynayso, dhiseyso ugana shaqeyso wadada tareenka ee cusub.
- Tallaabada HS2 Ltd ee Warqada Macluumaadka Shaqada iyo Tababarka (G4) (Juun 2015). Tani waxay ku tuseysaa sida HS2 Ltd ay u tababarto iyo oo u shaqaaleyso dadka si ay u dhisto oo uga shaqeysiiso wadada tareenka wayna ka go'an tahay fursadaha loo siman yahay ee kooxaha degaanka, aan sidaan ku filneyn loo metelo ama fursadahooda dhaqaale hooseeyo.
- Xirmada magdhowga hantida HS2 waxay sameysaa qorshayaal caawinaya inay maareeyaan xaaladaha khaaska ah, saa daraadeed HS2 Ltd waxau sameyn kartaa 'hagaajin macquul ah' oo hoos imaneysa Qaybta 20 ee Heerka Sinnaanta.

Warqadaha kale ee ku saabsan qorshayaasha dib loo eegay ee Euston waxaa ka mid ah:

- Warbixinta Sinnaantu waxay Saameysaa Qiimeynta: Boosteejada Euston ee CFA iyo Tallaabada (Sibteemar 2015)
- Qoraalka Degaanka Dheeraadka ah 2 iyo Qoraalka Degaanka Bixinta Dheeraadka ah ee 3aad: Warbixinta Goobta Fikrad isweydaarsiga Bulshada Buugga 2aad
- Qiimeynta Saameynta Caafimaadka Addendum:Boosteejada Euston iyo Tallaabada Goobta (sibteembar 2015)
- Qoraalka Degaanka London ilaa Galbeedka Midlands: Buugga 5 Lifaaqyada Farsameed. Waxqabadka Dhismaha Xeerka Qabyo-qoraalka ah (Nofeembar 2013)

Waxaad ka heli kartaa dhammaan waraaqahan iyo qorshayaashan interneetka ah www.gov.uk/hs2

Kala xiriir

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir HS2 Ltd miiska caawimaada Xiriirka Bulshada **020 7944 4908** ama **hs2enquiries@hs2.org.uk**